



Tababarka Waalidiinta: Caruurta Ka Waran?

Xogtii U Dambaysay Ee Dacwadaha Qoyska Ee Ku Saabsan Coronavirus (Covid-19)

Ilaa amar dambe, fasalada tababarka waalidiinta ee fool ka foolka ah waxaa loo bedelayaan ka qeybgal marti gelin la isu diro

Fadlan isu diiwaan geli sida aad isu diiwaan gelin laheyd Tababarka Waalidiinta. Haddii aad dooneyso in lacagta lagaa daayo, iimeyl u soo dir parentseminar@kingcounty.gov ka hor inta aadan is diiwaan gelin.

Waxaa lagu weydiinayaan halka lagaala soo xiriiri karo marka aad is diiwaan gelineyso. Fadlan hubi in macluumaadkaagu sax yahay, si boostada ama iimeyl laguugu soo diro qoraalada la xiriira wacyi gelinta.

Marka aad akhriso qoraalada, waxaa lagaa doonayaa in aad soo dirto iimeyl aad ku cadeyneyno in aad akhrisay qoraalada Tababarka Waalidinta. Fadlan u firso haddii aadan soo dirin iimeylka aad ku cadeyneyno in aad akhrisay qoraalada laguu soo diray, laguuma soo dirayo shahaadada in aad dhameysatay tababarka.

Marka iimeylka cadeynta ah na soo gaaro, waxaa laguu soo dirayaa shahaadada in aad qaadatay tababarka. Nuqul (koobi) ayaa laguu soo dirayaa si aad meel u dhigato. Shahaadada asalka ah waxaa loo dirayaa Maxkamadda Sare ee Degmada King.

Haddii aad qabto wax su'aal ama dareen ah, fadlan iimeyl ugu soo dir parentseminar@kingcounty.gov

Sidee la isu diiwaan geliyaa:

Barta internetka:

Fadlan soo booqo <https://kcscparentseminar.eventbrite.com>. Waxaa lagu soo dirayaa cadeyn ah in lagu diiwaangeliyey markiiba.

Boostada:

Waxa aad iimeyl u soo diri kartaa Parentseminar@kingcounty.gov si laguugu soo diro foomka. Fadlan u firso haddii aad isku diiwaangeliso boostada ama fool ka fool waxa aad sugeysaa laba todobaad si laguugu soo diro cadeynta is diiwaangelinta.

Lacagta Tababarka Waalidiinta:

Lacagta Tababarka Waalidiinta waa 40\$ qofkiiba iyo lacag dheeraad ah. Waxaa laga yaabaa in aad bixiso \$35 dheeraad ah haddii aad is daawaangeliso taariikhda dhageysiga dacwada ka dib. Macluumaadka ku saabsan sida lacag yar loo bixiyo ama lacagta lagaaga daayo, fadlan akhri [Tilmaamaha Yareynta Kharashka](#). Haddii aad ka soo baxdo shuruudaha lagaa daayo kharashka, fadlan la xiriir Parentseminar@kingcounty.gov si aad u hesho erayga sirta ah ee is diiwaangelinta. Haddii aad dooneyso macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan ka dhaafista kharashka, fadlan la xiriir (206) 477-2745.

Macluumaad dheeraad ah:

Dacwadaha uu khuseeyo waa kuwa la diiwaangliyey wixii ka dambeeyey Janaayo, 2011 ee Degmada King kaliya. *Sida uu dhigayo sharciga LFLR 13(c)(2), ka qeybgalka tababarka waa mid waajib ah in la qaato lixdan (60) maalmood laga bilaabo taariikhda lagu soo gaarsiiyo warqadaha maxkamadda. Haddii aadan ka qeyb gelin tababarka ka hor taariikhda loo qabtay dacwada, waxaa lagaa qaadayaa \$35 oo ah in aadan nidaamka raacin, sida uu dhigayo Sharciga degmada King ee 16984.*

Fiilo Gaar Ah: Haddii aad horey u qaadataay "Caruurta Ka Waran (What about the Children?)" Tababarka Waalidiinta, in aad ka qeyb qaadato waa la idinku dhiirigelinaya laakiin waajib idinkuma aha. Si aad u hesho nuqul (koobi) shahaadada ka qeyb galka tababarka, fadlan la soo xiriir Xafiiska Xogheynta ee 206-296-9300.

Su'aalo dheeraad, la xiriir xiriiriyyaha tababarka
ee: ParentSeminar@kingcounty.gov